

Talaalka ilmahaaga ee lagu taliyo

Da'da ilmaka	Xanuunada	Tirada irbadaha
6 todobaad	Rotavirus (talaal afka laga siinayo) Qaaxo caruurta ugu jirta khatarta	0 (1)
3 bilood	Rotavirus • Garwacatada • Teetanada • Xiiqdheer • Booliyada • Caabuq misigta ah • Joonis B • Xanuunka Pneumococcal	2
5 bilood	Garwacatada • Teetanada • Xiiqdheer • Booliyada • Caabuq misigta ah • Joonis B • Xanuunka Pneumococcal	2
12 bilood	Garwacatada • Teetanada • Xiiqdheer • Booliyada • Caabuq misigta ah • Joonis B • Xanuunka Pneumococcal	2
15 bilood	Jadeecada • Mumps • Rubella	1

Kahor iyo kadib talaalka

U sheeg kaaliyaha caafimaadka shacabka hadii:

- Leeyahay xasaasiyad ama xanuun kale
- Uu ilmuhu dhawaan qaatay dawooyin ama talaalo kale
- Ay hooyadu qaadatay dawooyin ay ku xakamaynayso difaaca jidhka ah intay uurka lahay iyo/ama intay naaska nuujinaysay.

Talaalka kadib, waa inaad 20 daqiiqo fahidana xarunta caafimaadka kahor inta aynaad ka tegin.

Badi caruurta waxay yeeshaan jawaab celin yar oo talaalka ah amaba maba yeeshaanba, inkasta oo laga yaabo inay qaar yeeshaan mid dhexdhexaad ah, jawaab celin ku meel gaadh ah, sida xumad yar. Haddii uu ilmuhu yeesho xumad ka badan 39°C iyo/ama lagu arko inuu hoos u dhacayo caafimaadkiisa guudi, waxaa laga yaabaa inay calaamad u tahay xanuun daran oo aan haduu doono ahayn jawaab celin talaal. La xidhiidh dhakhtarka hadii aad ka walaacdo caafimaadka ilmahaaga.

Talaalada la isku daro

Dhawr talaalo oo barnaamijka kamid ah waxaa lagu bixiyaa isku hal mudmo. Waxaa loo yaqaan taas isku darka talaalka. Waxay ka dhigan tahay in irbadaha lagu mudayo ilmuhu kayar yihiin. Talaalka la isku daraa waxay keenaan jawaab celin yar oo goobta laga muday ah marka la barbardhigo talaalka hadii gooni gooni loo kala siiyo.

Barnaamijka talaalka caruurta da'da dugsiga ah

Caruurta da'da dugsiga waxaa la siin doonaa xadi sare oo talaalo gaar ah. Caruurta ku jirta fasalka 7 (da'da 12-13 jirka), waxaa lasiin doonaa talaalka bilaa aadanka ee papillomavirus (HPV).

Liiska talaalada ilmuhu qaatay

Dhamamaan talaalada lasiiyay ilmaha waxaa lagu duwaan galiyay duwaanka talaalka elektrooniga ah ee Norway ee SYSVAK. Macluumaadka talaalada caruurnimada waxaa laga heli karaa www.helsenorge.no

Hadii aad qabto wax su'aal ah waydii kaaliyaha caafimaadka shacabka.

Wax badan ka ogow: www.fhi.no/om-bvp (kaliya Norwegian ayuu ku qoran yahay)